

# Waraaqda Wararka Xajmiga Shaqada Janitorial



Juun 2019

Soo Baxa 1, Nuqul 1



## Maxaa daraasad loogu samaynaya shaqada nadiifinta dhulka?

Shaqada nadiifintu waa mid warwar badan, u baahan wax badan, oo shaqaaluhu waxay ku jiraan khatar aad u badan inay dhaawacmaan. Dadka qaar dhulka xaadhaa waxaa dhiri karta inayna sheegin dhaawacooda maadaama ayna garanayn sida loo sheegayo, waxaana dhici karta inay ka baqdaan inay shaqada waayaan.



## Yaa samaynaya daraasada?

Waaxda Sharciyada Gobolka Washington waxay Barnaamijka Badbaadada iyo Caafimaadka iyo Daraasada Kahortaga (Safety and Health Achievement Recognition Program, SHARP) inay u samayso daraasada ku saabtan xadiga dhaawaca shaqada nadaafada. SHARP waa barnaamij Department of Labor & Industries (Waaxda Shaqada iyo Warshadaha) ah taas oo samaysa daraasad lagu hormarinayo goobta shaqada.

Yoolku waa in la ogaado xaalada shaqada iyo wixii walaac badbaado ah taas oo looga heley si toos ah shaqaalaha nadaafada. SHARP waxay qaban doontaa waraysi shakhsi ahaaneed, koox diirada la saaray, xog uruurin taleefanka ah, xog uruurin gobolka oo dhan ah, iyo qiimayn culayska shaqada ah oo goobta ah.



---

## Macluumaadka laga helo Dadka Ka Qaybgalayaasha ah

“Waxaan go'aansaday inaad la xidhiidho ururada oo aan la xidhiidho SHARP maadaama oo [culayska shaqada] uu bilaabay inuu saameeyo caafimaaadkayga. Waxa ay sidoo kale ku saabsan tahay badqabka shaqaalahayga ee mudo kadib, culayska shaqadu waxa uu saamaynayaa caafimaaadkooda oo ma wanaagsana in laga shaqeeyo meelaga khatarta kuu ah oo kuula dhaqmaya sidii aad mishiin tahay oo kale.”

-Ma Cruz de Villar del Amador, 4 sano khirbad nadiifin ah ayuu leeyahay



---

## Wada Shaqaynta

Shirkado badan oo nadaafada ahi waxay sidoo kale ka walaacaan wixii ku saabsan dhaawacyada shaqaalahooda, oo dhawr ayaa naga ogolaaday inaanu inta aanu u tagno aanu shaqadooda daawano.

Tani waxay ka dhigan tahay in aanu qiimaynta karno shaqada wakhtigaa ay qabanayaan, oo aanu wada shaqayn karno, waxaanu keeni kartaa xal wixii mushkilad ah ee shaqada nadaafada ku hadhaysan.

---

## Waxaanu doonaynaa inaan macluumaadkaaga nala wadaagto!

Ilaa iminka, shaqaalahaa nadaafadu waxay sheegeen walaacyada caafimaaad iyo badbaado ee ay qabaan oo ah:

- Korodhka culayska shaqada iyo qaabkeeda.
- Agabka nafiidinta oo ka jaba.
- La'aanta agabka nadiifinta.
- Tabobar badbaado la'aan.
- Dagaal iyo tacadi.
- Sheegid la'aan dhaawaca taas oo ku timid macluumaad la'aan iyo baqi.